# Language Access Plan
# Qorshaha Helitaanka Luuqada

Janaayo 6, 2023

Ogolaanshaha:

Julia S. Moore, P.E. Taariikhda
Xoghayaha
Wakaallada Khayraadka dabiiciga ah ee Vermont

# Wakaallada Khayraadka dabiiciga ah ee Vermont
# Qorshaha Helitaanka Luqadda

## Liiska Mawduucyada

A. Hordhac ..... 3
B. Qeexitaano ..... 6
C. Xeerka ANR ee Helitaanka Luuqada ..... 9
D. Shan talaabo oo lagu Qorsheynaayo Dhaqan Gelinta ..... 10
Talaabada #1: Aqoonsiga Shaqsiyaadka U baahan Helitaanka Luuqada ..... 10
Talaabada #2: Bixinta Luuqada iyo Helitaanka Isgaarsiinta ..... 10
2.A. Helitaanka Luuqada ee Dadka U baahan Adeegyada Helitaanka Luuqada ..... 10
2.B. Helitanaka Isgaarsiinta Dadka uu Difaacaayo Sharciga Ameerikaanka Naafada ah iyo Sharciga Baxnaaninta ..... 12
Talaabada #3: Tababarka Shaqaalaha iyo Kaalmo Qaateyaasha ANR ..... 12
Talaabada #4: Bixinta Ogeysiiska Dadwaynaha ee Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta ..... 13
Talaabada #5: La socoshada, Qiimeynta, iyo Wax ka badelka Qorshaha Helitaanka Luuqada ..... 13
E. Ku dhaqanka ..... 14
Lifaaqa A: Erayada Lasoo Gaabshay ..... 15
Lifaaqa B: Tixraacyada ..... 16
Lifaaqa C: Aasaaska Sharciga ..... 18

## A. Hordhac

Helitaanka Luuqada (LAP) ee Wakaallada Khayraadka dabiiciga ah ee Vermont (ANR) waxaa ku jira xeerka iyo talaabooyinka qeexaaya sida ANR ay u siin doonto xogta iyo adeegyada dadka ku hadla luuqadaha aan ahayn Ingiriisiga ama dadka adeegsada noocyada kaladuwan ee isgaarsiinta, sida dadka qaba dhibaatooyinka maqalka, aragga, ama hadalka.  ANR ayaa u taagan inay siiso qof kasta oo reer Vermont ah isgaarsiin waxtar leh, fursad loo siman yahay, iyo helitaanka macnaha leh ee barnaamijyadeeda, hawlaheeda, iyo adeegyadeeda.

LAP waxaa ku jira talaabooyinka lagu taageeraayo aqoonsiga iyo tageerada dadka ku hadla luuqado aan ahayn Ingirriis iyo dadka adeegsada qaabab kaladuwan ee isgaarsiinta si loo xaqiijiyo in ay helaan xog sax ah, fursad loo siman yahay, iyo helitaanka macnaha leh ee barnaamijyada. adegeyada, iyo hawlaha ANR. Tlaabooyinkaan ayaa kala ah: (1) aqoonsiga shaqsiyaadka u baahan helitaanka luuqada, (2) u fududeynta luuqada iyo helitaanka xogta, (3) tababarka shaqaalaha iyo dhinacyada hela deeqaha ama qandaraasyada, (4) bixinta ogeysiiska dadwaynaha ee helitaanka luuada iyo xogta, iyo (5) kormeerka, qiimeynta, iyo wax ka badelka Qorshaha Helitaanka Luuqada. ANR ayaa diyaarisay Habraaca Dhaqan Gelinta LAP oo gaar ah (Habraaca) kaasoo ah hagaha qodobeysan si looga taageero shaqaalaha ANR iyo dhinacyada helaaya deeqaha ama qandaraasyada ANR dhaqan gelinta LAP.

Dadka aan adeegsan Ingiriisiga oo ah luuqadooda koobad ayna yar tahay awoodooda ku hadalka, fahanka, akhriska, ama qoraalka Ingiriisiga ayay laanta Tirakoobka ee Mareykanku u aqoonsataa iny qabaan "aqoonta kooban ee Ingirisiga" ama LEP. Sida ku cad 2016-2019 U.S. Xog uruurinta Bulshada Mareykanka ee Laanta Tirakoobka, Vermont ayaa leh in ka badan 8,300 oo qof oo u dhexeeya da'aha 5 sano jir ama ka wayn oo ku hadla aan si fiican ugu hadli karin Ingiriiska.[1] Habraaca waxaa ku jira liiska luuqadaha guud ee aan ahayn Ingiriiska ee looga hadlo Vermont.

Erayada "dadka aqoontooda Ingiriisigu kooban tahay" iyo "dadka leh LEP" ayaa badanaa loo adeegsadaa tusmada ferdaaka iyo gobalka. Hase yeeshee, Qorshahaan, ANR ayaa adeegsanaysa weedha "dadka u baahan helitaanka adeegyada luuqada" badelkuu ay adeegsan lahayn weedha "dadka leh LEP" waayo Xafiiska Sinaanta Isirka ee Vermont ayaan ku talinayn adeegsiga weedha "aqoonta kooban ee Ingiriisiga" ama "LEP". Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan tallada Xafiiska Sinaanta Isirka, ka eeg Warbixinta Helitaanka Luuqada ee 2023.

Dadka Dhagoolka ah, Maqalkoodu Liito, Indhah iyo Dhagaha la', iyo dadka lumiyay maqalka, aragga, ama hadalka ayaa adeegsda noocyada kladuwan ee isgaarsiinta. Tusaale, ddka indhoolka ah ama aragoodu liito ayaa ku bixin kara kuna heli kra xogta qaab hadal ah badelkii ay adeegsan lahaayeen qoraal, halka dadka Dhagoolka ah, Maqalkoodu Liito, ama Indhaha iyo Dhagahaba la' ay ku bixin karaan kuna heli karaan

[1] Laanta Tirakoobka ee Maraykanka, Xog uruurinta Bulshada Mareykanka, Xogta Qyaasaadka 2020 ACS ee 5-ta sano, Liiska B16001, Dadka 5 sano jir ama ka wayn.

xogta qoraal ahaan iyo luuqada ishaarada badelkii ay hadli lhaayeen. Waxaa jira ku dhawaad 70,000 oo dad ah[2] oo ku nool Vermont kuwaasoo lumiyay maqalka iyo inta u dhexaysa 13,000-16,000 dad ah oo indhool ah ama lumiyay aragga.[3] Luuqadaha ugu badan ee aan lagu hadlin ee Vermont waa Luuqada Naafada ee Maraykanka iyo Luuqada Naafada ee Nepali.

LAP ayaa la abuuray si waafqsan sharciga gobalka iyo federaalka iyo qaab waafaqsan tilmaamaha federaalka. Xogta aasaasiga ah ee faahfaahsan ee shuruudaha sharciga ah ee qabanaaya ANR ayaa ku qoran Liiqa C waxaana ku jira:

- Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah 1964 (Title VI), dhaqan gelinta xeerarka iyo tilmaanta mamnuucaaya takoorka—ula dhaqanka qaab faquuq ku jiro iyo saamaynta aan loo sinayn—kuwaasoo ku saleysan isirka, midabka, ama wadanka qofku ka soo jeedo kana dhaca barnaamijyada ama shaqooyinka helaya caawimaada maal gelinta federaalka.[4]
- Sharciga Soo Celinta Xuquuqda Madaniga ah ee 1987, kaasoo qeexaaya in wakaaladaha hela lacagaha iyo caawimaada federaalka, sida ANR, ay qasab tahay inay ku dhaqmaan sharciyada xuquuqda madaniga ah ee dhammaan xarunta ama wakaallada. Ku dhaqanka sharciga xuquuqda madaniga ah ayaa qabanaaya dhammaan barnaamijyada iyo shaqooyinka xarunta ama wakaallada, ayadoo aan loo eegayn in barnaamijku heo lacagaha federaalka iyo in kale.[5]
- Qaybta 504 ee Sharciga Baxnaaninta[6] iyo Sharciga Ameerikaanka Naafada ah (ADA), dhaqan gelinta xeerarka, iyo tilmaanta shaqsiyaadka u qalma ee naafada ah ka difaacaaya takoorka la xiriira barnaamijyada, adeegyada, iyo hawlaha wuxuuna ka doonayaa qaateyaasha deeqaha federaalka inay xaqiijiyaan in qof kasta oo naafo ah uu helo isgaarsiin waxtar leh.[7]
- Amarka Fulinta 13166, *Kor u qaadista Helitaanka Adeegyada ee Dadka Aqontooda Ingiiriisiga ay Kooban tahay*, kaasoo xaqiijinaaya sharciga helitaanka luuqada ee Title VI sheegayana shuruudo dheeraad ah..[8]

---

[2] Gudiga Talo bixinta Vermont ee Dhagoolka, Dadka Maqalkood Culus yahay, iyo Dadka Dhagoolka/Indhoolka ah, https://dail.vermont.gov/sites/dail/files//documents/Final_2022_D-HH-DB_Council_Report.pdf?msclkid=edc1a005c27311ec8204a3e2c4ea0a28.

[3] Waaxda Naafooyinka, Waayeelka iyo Nolosha Madaxa Banaan ee Dadka Indhoolka ah iyo kuwa Aragga Naafada ka ah ee Vermont, https://dbvi.vermont.gov/.

[4] 42 U.S.C. § 2000d et seq. Laga soo xigtay: https://www.govinfo.gov/content/pkg/USCODE-2008-title42/html/USCODE-2008-title42-chap21-subchapV.htm; 40 C.F.R. Qaybta 7: https://www.epa.gov/sites/production/files/2013-09/documents/40p0007.pdf.

[5] Sharciga Soo celinta Xuquuqda Madaniga ah 1987 (Pub. L. 100-259) ayaa qabanaaya adeegsigaan guud ee: (a) Title VI ee Sharciga Soo Celinta Xuquuqda Madaniga ah 1964, (b) Title IX ee Isbadellada Waxbarashada oo soo baxay 1972 (Pub. L. No. 92-318, 86 Stat. 373-75), (c) Sharciga Takoorka ku Saleysan Da'da 1975 (Qaybta 4 ee 29 U.S.C. § 623 (1975), iyo (d) Qaybta 504 ee Sharciga Baxnaaninta 1973 (29 U.S.C. § 794 (1985 & Sup. 1988)).

[6] 29 U.S. C. § 794.

[7] *Id.*; 40 C.F.R. Part 7, Subpart C; 28 C.F.R. Qaybta 35, Qodob hoosaadka E.

[8] Exec. Amarka lambarkiisu yahay 13166, 65 Xeerka Federaalka 50,121 (Agoosto 11, 2000). Waxaa lagasoo xigtay: https://www.lep.gov/sites/lep/files/resources/eolep.pdf.

- Tusmada Wakaalada Difaac Bii'ada (EPA) ee Maraykanka oo ciwaankiisu yahay, *Tusmada ku sucoto Qaateyaasha Kaalmada Dhaqaalaha ee Wakaalada Difaac Bii'ada ee qusaysay Mamnuucida Takoorka Ku saleysan Wadanka Qofka ee ku qoran Title VI taasoo Saamaynaysay Dadka Aqoontooda Ingiriiska ay Kooban tahay* (Tusmada EPA LEP). [9]

Wixii su'aalo ah oo quseeya LAP, la xiriir Agaassimaha Xuquuqda Madaniga ah iyo Cadaallada Bulshada ee ANR oo aad ka helayso ANR.civilrights@vermont.gov.

[9] 69 Fed. Reg. 35602 (Juun 25, 2004) (oo halkaan loogu yeeraayo "Tusmada EPA LEP"). Waxaa lagasoo xigtay: https://www.govinfo.gov/content/pkg/FR-2004-06-25/pdf/04-14464.pdf.

## B. Qeexitaano

Qaybtaan waxaa ku jira qeexitaanno si loo taageero fahanka sida ANR ay u bixin doonto isgaarsiin waxtar leh iyo helitaanka macnaha leh ee barnaamijyada, adeegyada, iyo shaqooyinka dadka ku hadla luuqad aan ahayn Ingiriis ama dadka u baahan qaababka kaladuwan ee isgaarsiinta. Qeexitaanadaan ayaa quseeya keliya Qorshahaan Helitaanka Luuqada iyo Habraaca waxayna waafaqsan yihiin sharciga iyo tilmaanta gobalka iyo federaalka.

**Kaalmooyinka iyo Adeegyada:** Waxaa sidoo kale loo yaqaanaa "kaalmaatiga kabista ah iyo adeegyada," waxaa laga wadaa qaababka loola hadlo dadka adeegsada noocyada kaladuwan ee isgaarsiinta. Kaalmaatiga iyo adeegyada waxaa ku jiri kara qalabka wax akhriya, qalabka qora qodobada muhiimka ah, turjumaannada dadka dhagaha iyo indhaha la' oo xirfadleh, nidamayada iyo aaladaha dhageysiga kaaba, qoraalka kumbuyuutarku taageeraayo ee islamar (CART), qoraallada la dul saaro muuqaalka, qoraraha qoraalka ama taleefannada qoraalka (TTY), taleefannada qoraalka leh, taleefannada muuqaalka ah, xogta lagu baxsho farta waawayn, Farta Indhoolka, codka, ama qaababka elektarooniga ah, iyo agabka kale iyo tignooloojiyadaha kaaba dadka qaba baahiyaha helitaanka xogat.

**Ku dhaqanka:** Xaalada agu qanci karo ee jirta marka qaataha kaalmada dhaqaalaha ee federaalka uu si waxtar leh u dhaqan gasho dhammaan shuruudaha Title VI ama u muujin karo in dedaal kasta oo daacad ah la sameeyay si loo gaaro yoolkaan.

**Wakiilka Loo Xilsaaray:** Waa wakaalad uu doortay ama uu magacaabay shaqsi u baahan adeegyada helitaanka Luuqada si ay ugu codsato adeegyada ayadoo asaga wakiil ka ah.

**Takoorka:** Takoorku waa fal (ama inaan wax talaabo ah la qaadin), haddii uu yahay mid loo qasday ama aan loo qasdin, kaasoo qof ku nool Mareykanka, ayadoo lagu saleeyay keliya isirka, midabka, wadanka qofka (oo luuqadu ku jirto), da'da, jinsiga, ama heerka awooda ama naafada loola dhaqmay si aan cadaalad ahayn gudaha barnaamij ama shaqo helaysa kaalmada dhaqaale ee federaalka. [10]

> Ula Dhaqanka Si Gaar ah: Takoorkaan sharci darada ah ayaa quseeya ula dhaqmida dadka isku xaalada ah sifooyin kaladuwan ayadoo lagu saleynaayo isirka, midabka, wadanka qofka (ayna ku jirto luuqada), jinsiga, heerka awooda ama naafada, ama da'da.
>
> Saamaynta aan loo sinayn: Noocaan takoorka sharci darada ah ayaa quseeya xeerarka iyo dhaqannada leh saamaynta takoorka ah.

[10] Marka laga soo tago Title VI ee 1964 Sharciga Xuquuqda Madaniga ah 1964 kaasoo mamnuucaaya takoorka ku saleysan isirk, midabka iyo wadanka, waxaa jira sharciyada kale ee federaalka ee aan qusayn takoorka iyo xeerarka la abuuray si ay u ilaaliyaan xuquuqaha madaniga ah iyo kuwa dastuuriga ah ee dhammaan shaqsiyaadka ku noo Mareykanka.

**Isgaarsiinta Wax ku oolka ah:** Isgaarsiinta xaqijinaysa in qofka adeegsanaaya qaababka kaladuwan ee isgaarsiinta ama qofka qaba dhibaatada luminta maqalka, aragga, ama hadalka ay heli karaan xogta ayna ku gudbiyaan luuqad ama qaab ay doonayaan una sahlaysa fursad loo siman yahay oo ay uga qabgalaan barnaamijyada, adeegyada iyo hawlaha ANR. Isgaarsiinta Wax ku oolka ah waa eray sharciyeed loo adeegsado xeerarka iyo tusmada federaalka ee dhaqan gelinta Sharciga Baxnaaninta iyo Sharciga Ameerikaanka Naafada ah.

**Kaalmada Dhaqaalaha ee Federaalka:** Kaalmada Dhaqaalaha ee Federaalka waxaa ku jira, laakiin kuma koobna, deeqaha iyo daymanka lacagaha federaalka; deeqaha ama sadaqooyinka hantida federaalka; tababarka; faahfaahinta shaqaalaha federaalka; ama heshiis kasta, qorshe kasta, ama qandaraas kale oo mid kamid ah ujeedooyinkiisu yahay bixinta kaalmada.

**Baaritaanka Afarta Qaybood:** Waa qiimeyn ku jirta tilmaanta EPA si loo go'aansho baahiyaha helitaanka Luuqada iyo talaabooyinka macquulka ah ee la qaadaayo si loo xaqiijiyo helitaanka macnaha leh ee dadka ku hadla luuqadaha aan ahayn Ingiriisiga.[11] Baaritaanka Afarta Qaybood, sida lagu qeexay Qaybta D.2a ee hoose, ayaa quseeya isku dheelitirka tirada dadka u baahan adeegyada helitaanka Luuqada, inta heer ee dadkaan lala hadlaayo ee u baahan adeegyada helitaanka Luuqada, tixgelinnada caafimaadka iyo badqabka bii;ada, iyo qarashka.

**Turjumaada:** Ujeedooyinka LAP-kaan marka laga hadlaayo, waa falka u badelida erayada lagu hadlay ama erayada lagu sheegay luuqada dhagoolka ayadoo loo turjumaayo luuqad kale ayadoo a ilaalinaayo isla macnaha.

**Adeegyada Helitaanka Luuqada:** Adeegyada Helitaanka Luuqada waxaa ku jira turjumaada iyo fasiraada dukumiintiyada oo loo turjumo luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Tan ayaa qusaysa labadaba luuqadaha lagu hadlo iyo kuwa dhagoolka.

L**uuqada iyo Helitaanka Isgaarsiinta:** Talaabooyinka ay qaadayso ANR si ay u bixiso isgaarsiinta waxtarka leh iyo helitaanka macnaha eh ee barnaamijyadeeda, adeegyadeeda, iyo hawlaheeda oo la siinaayo dadka u baahan adeegyada helitaanka luuqada iyo dadka qaba heerarka kaladuwan ee naafada maqalka, aragga, ama hadalka iyo adeegsiga qaababka kaladuwan ee isgaarsiinta.

**Bixiyaha Adeegyada Luuqada:** Waa qof bixiya adeegyada turjumaada ama fasiraada.

**Helitaan macno leh:** Adeegyada Helitaanka Luuqada oo bixinaaya xogta saxda ah, wakhtigeeda ku siman, iyo isgaarsiinta sugan ee dadka adeegsada luuqadaha iyo ama qaababka kaladuwan ee isgaarsinta kuwaasoo lacag la'aan ah. Helitaanka macnaha leh waa eray sharciyeed lagu adeegsado xeerarka iyo tusmada federaalka ee dhaqan gelinta Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah.

**Qaababka Isgaarsiinta:** Waxaa laga wadaa noocyada isgaarsiinta ee ay adeegsadaan dadka uu difaacaayo Sharciga Ameerikaanka Naafada ah iyo Sharciga Baxnaaninta, ayna ku jiraan isgaarsiinta hadalka, isgaarsiinta ishaarada ah, isgaarsiinta muuqaalka ah, isgaarsiinta qoraalka ah, ama dhageysiga.

[11] Tusmada EPA LEP, *supra* note 9.

**Ku dhaqmid La'aanta:** Waa xaalad jirka marka qaatuhu ku fashilmo inuu buuxiyo shuruudaha loo xilsaaray uuna muujiyay inuusan samayn dedaal daacad ah si uu u dhaqan gasho sharciyada iyo xeerarka xuquuqda madaniga ah ee gobalka iyo federaalka.

**Luuqada Hooyo**: Luuqadda uu qof adeegsado inta badan si uu waax faseex ah ugu hadlo.

**Barnaamiyada, Adeegyada, iyo Hawlaha:** Waxaa loola jeedaa dhammaan shaqooyinka ANR.

**Qaataha:** Gobal kasta ama degmo kasta oo hoos tagta, qayb kasta oo gobal kamid ah ama waaxihiisa, wakaalad kasta oo dawladeed ama gaar loo leeyahay xarunta, ururka, ama wakaalad kale, ama qof kasta oo lacagaha federaalka ah iyo kaalmada si toos ah loo siiyo ama loosoo mariyo deeq qaate kale, uuna ku jiro qof kasta oo booskiisa dhaxlay, wakiil, ama qof uu ku wareejiyay qaatuhu, laakiin uusan ku jirin dheefsadaha ugu danbeeya ee kaalmada.[12] ANR waa qaataha lacagaha iyo kaalmada federaalka.

**Hooy Amaan ah:** Kani waa weedh loo adeegsado xeerarka ayadoo ah qodob sharci ah si loo siiyo difaac ka dhan ah ganaax ama qaan. Marka loo eego mawduucaan, "goob amaan ah" ayay adeegsataa dawlada federaalka ah taasoo loola jeedo in haddii qaataha deeqda, sida ANR, uu bixinaayo xogta turjuman ee qoraalka ah xaaladaha qaarkood, oo lagu qeexay Tilmaanta EPA LEP iyo Tilmaanta Waaxda Cadaallada (DOJ) LEP,[13] in talaabada noocaa ah loo aqoonsan doono cadeynta xoogan ee ku dhaqanka waajibaadka turjumaada qoraalka ah ee qaataha.[14]

**Qayb Qaataha:** Wakaalad hesha kaalmada dhaqaalaha ee Federaalka oo loosoo mariyo deeq qaate, sida wakaalad hesha deeq ama qandaraas.

**Turjumaad:** Marka loo eego ujeedada LAP, waa hanaanka u badelida qoraalka qoran oo laga badelo hal luuqad loona badelo qoraal u dhigma oo luuqad kale ah. Qoraalka ayaa noqon kara mid elektaroonig ah.

**Dukumiinti Muhiim ah:** Agabka warqadda ah ama elektarooniga ah oo ay ku jirto xogta muhiimka u ah suuragelinta helitaanka macnaha leh ee barnaamijyada, hawlaha, iyo adeegyada ANR, ama ay ku jirto xogta ku saabsan habraacyada ama hanaannada uu doonaayo sharcigu. Ku sifaynta dukumiinti inuu yahay :muhiim: aaa ku xiran, muhiimada barnaamijka, xogta, hawsha, ama adeegga quseeya, iyo cawaaqibka kasoo gaaraaya qofka u baahan adeegyada Helitaanka Luuqada haddii aan xogta loo siin si sax ah ama wakhtiga ku haboon.

---

[12] 40 C.F.R. § 7.25.

[13] Qodobada goob amaan ah ee Tusmada Waaxda Caddaaladda ee Mareykanka ee 2002 LEP 67 Fed. Reg. 41455, 41464 (Juun 18, 2002) (oo halkaan loogu yeeraayo Tusmada "DOJ LEP"). Waxaa lagasoo xigtay: https://www.govinfo.gov/content/pkg/FR-2002-06-18/pdf/02-15207.pdf.

[14] Tusmada EPA LEP, *supra* note 9.

## C. Xeerka ANR ee Helitaanka Luuqada

Waa xeerka ANR si ay u siiso dadka ku hadla luuqad aan ahayn Ingiriisiga helitaanka macnaha leh ee barnaamijyaDeeda, adeegyadeeda, iyo hawlaheeda. xaqiijinta helitaanka macnahaha leh ayaa ka dhigan bixinta adeegyada Helitaanka Luuqada oo sax ah, wakhtigeeda timaada, oo wax ku ool ah kuwaasoo bilaash ah oo waafaqsan sharciga federaalka.

Sidoo kale waa xeer u degsan ANR si ay u siiso xogta waxtarka leh dadka Dhagoolka ah, Maqalku liito, Indhoolka ah, Indhaha iyo Dhagahaba La', adeegyada qaababka Isgaarsiinta ee kale, ama uu difaacaayo Sharciga Ameerikaanka Naafada ah iyo Sharciga Baxnaaninta. ANR ayaa bixinaysa isgaarsiin wax ku ool ah oo bilaash ah laguna bixinaayo wakhti ku haboon si loo sahlo inay helaan fursad loo siman yahay oo ay uga qaybgalaan barnaamijyada, adeegyada, iyo hawlaha, taasoo waafaqsan sharciga federaalka iyo gobalka. ANR ayaa bixin doonta isgaarsiinta wax ku oolka ah oo lagu bixinaayo qaab difaacaaya sirta iyo madax banaanida qofka. Xeerarka isgaarsiinta Wax ku oolka ah waxaa ku jiri kara agabka kaalmaatiga ee haboon iyo adeegyada.

## D. Shan talaabo oo lagu Qorsheynaayo Dhaqan Gelinta

ANR ayaa adeegsan doonta shan talaabo si loo dhaqangasho Xeerka Helitaanka Luuqada. Talaabooyinkaan ayaa taageeraaya aqoonsiga iyo taageerada shaqsiyaadka u baahan adegeyada helitaan luuqada iyo/ama dadka adeegsanaaya qaababka kaladuwan ee isgaarsiinta si loo xaqiijiyo isgaarsiinta wax ku oolka ah iyo helitaanka macnaha leh si loo helo barnaamiyada, Adeegyada, iyo Hawlaha ANR. Talaabooyinka ayaa kala ah: (1) aqoonsiga shaqsiyaadka u baahan helitaanka luuqada, (2) siinta luuqada iyo helitaanka xogta, (3) tababarka shaqaalaha iyo laamaha hoose ee ANR, (4) bixinta ogeysiiska dadwaynaha ee helitaanka luuada iyo xogta, iyo (5) kormeerka, qiimeynta, iyo wax ka badelka LAP. Habraaca Dhaqan gelinta ANR LAP ayaa bixinaaya si faahfahsan sida ANR ay u dhaqan gelinayso LAP.

### **Talaabada #1**: Aqoonsiga Shaqsiyaadka U baahan Helitaanka Luuqada

ANR ayaa adeegsan doonta qaabab dhawr ah oo lagu qeexay Habraaca, si loo aqoonsado shaqsiyaadka u baahan adeegyada Helitaanka Luuqada. Tan waxaa ku jira ilaha kaladuwan ee xogta federaalka, gobalka, iyo deegaanka ee dadka iyo iskaashi aan la samayno wakaaladaha kale. Shaqaalaha ANR ayaa la imaanaaya "Kararka Helitaanka Luuqada ee ANR" kulannada dadwaynaha si ay nooga caawiso aqoonsiga dadka u baahan helitaanka Luuqada. Si loo taageero hawlaha wada shaqeynta dadwaynaha ee mustaqbalka, ANR ayaa haynaysa diiwaannada xogaha dadka u baahan adeegyada Helitaanka Luuqada iyo diiwaannada codsiyada adeegyada Helitaanka Luuqada ee dadka adeegsada qaababka kaladuwan ee isgaarsiinta. ANR ayaa u haynaysa diiwaannada qaab difaacaaya sirta iyo madax banaanida qofka.

### **Talaabada #2: Bixinta Luuqada iyo Helitaanka Isgaarsiinta**

Marka ANR ay dhamayso Talaabada #1, talaabada xigta waa in la go'aanso in la bixinaayo iyo sida loo bixinaayo helitaanka luuqada iyo isgaarsiinta. Qaybta 2.A ayaa qeexaysa hanaanka bixinta helitaanka luuqada ee dadka u baahan adeegyada Helitaanka Luuqada halka Qaybta 2.B ay qeexayso hanaanka bixinta helitaanka luuqada ee dadka adeegsada qaababka kaladuwan ee isgaarsiinta. Hanaanadaan ayaa si faahfaahsan loogu qeexay Habraaca.

#### 2.A. Helitaanka Luuqada ee Dadka U baahan Adeegyada Helitaanka Luuqada

ANR ayaa adeegsan doonta Baaritaanka Afarta Qaybood oo bar biloow u noqonaaya go'aaminta baahiyaha helitaanka luuqada iyo talaabooyinka macquulka ah ee ay ANR ay qaadayso si loo xaqiijiyo helitaan macno leh ee shaqsiyaadka u baahan adeegyada Helitaanka Luuqada kuwaasoo bilaash ah waafaqsanna sharciga federaalka. [15] ANR

[15] Tusmada EPA LEP, *supra* note 9.

ayaa isku dheelitiraysa afartaan qaybood si loo xaqiijiyo helitaanka macnaha leh ayadoo aan caqabad wayn la saarayn ganacsiyada yaryar, dawladaha hoose, iyo ururada bulshada.[16] Baaritaanka Afarta Qaybood ayaa qiimeeya:

- **Sababta 1:** Tirada ama qaybta dadka u baahan adeegyada Helitaanka Luuqada ee u qalma inay u adeegaan ama laga yaabo inay adeegsadaan barnaamijkam shaqada, ama adeegga ANR. Sababtaan ayaa naga caawin doonta inaan go'aamino luuqadaha ay tahay in dukumiintiga lagu turjumo.
- **Sababta 2:** Xadka dadka u baahan adeegyada Helitaanka Luuqada ay la kulmi karaan barnaamijka, shaqada, ama adeegga ANR. Qaybtaan ayaa naga caawin doonta go'aaminta heerka ugu sareeya ee la siin karo turjumaada dukumiintiyada muhiimka ah.
- **Sababta 3:** Nooca iyo muhiimada barnaamijka, shaqada, ama adeegga ee uu barnamaijku bixiyay ay u leeyihiin nolosha dadwaynaha. Sababtaan ayaa naga caawinaysa go'aaminta in haddii aysan jirin adeegyada Helitaanka Luuqada ama xogta ay sababi karto saamayno degdeg ah ama xun oo ku dhaca caafimaadka iyo badqabka dadwaynaha, khataraha bii'ada, ama cawaaqibyada kale ee ku dhici kara dadka u baahan adeegyada Helitaanka Luuqada.
- **Sababta 4:** Shaqaalaha ANR waa inay qiimeeyaan dookhyada qiimaha jaban ee bixinaaya adeegyada Helitaanka Luuqada oo ku filan oo sax ah kahor inta aan la xadidin adeegyada sababo la xiriira ciriiri dhaqaale. Qaybtaan ayaa isku dheelitiraysa helitaanka dhaqaalaha iyo suuragalnimada qarashaadka. Isku dheelitirka afartaan sababood ayaa ka caawinaysa ANR inay aqoonsato oo turjunto dukumiintiyada muhiimka ah, guud ahaan ama qayb kamid ah, una baesho luuqadaha shaqsiyaadka saamayntu ku dhacayso ee u baahan adeegyada Helitaanka Luuqada wakhti ku haboon gudihiis. Ku sifaynta dukumiintiga "muhiim" ayaa ku xiran tixgelinno kaladuwan, sida muhiimada xogta; barnaamijka, shaqada, ama adeegga quseeya, iyo cawaaqibka ka dhalan kara in aan la bixin xogta si sax ah ama wakhtiga ku haboon.

ANR ayaa samayn doonta dib u eegis hore si ay u aqoonsato dukumiintiyada muhiimka ah si loo turjumo, guud ahaan ama qayb ahaan. AnR ayaa intaas kadib cuskan doonta LAP iyo Habraaca si ay u bixiso turjumaadaha qoraalka ah ee dukumiintiyada muhiimka ah marka loo baahdo. ANR ayaa adeegsan doonta qandaraasleyaasha adeegyada Luuqada ee Gobalka Vermont si ay u bixiyaan turjumaada, fasiraada, turjumaada lagu baxsho taleefanka.[17] ANR ayaa qaadi doonta talaabooyinka ku haboon si loo xaqiijiyo helitaanka luuqada iyo isgaarsiinta lagu bixiyo ayadoo la

[16] *Id.*

[17] Qandaraayada Hadda ee Gobalka oo Dhan, https://bgs.vermont.gov/purchasing-contracting/contract-info/current#Translation%20Services.

adeegsanaayo bixiyaasha adeegga luuqada oo xirfad leh (tusaale, turjumaan) iyo in ay hayso diiwaannada shaqooyinkeeda.

ANR ayaa sidoo kale adeegsan doonta xeerka "Goobta Amaanka ah" ee turjumaada qoraalka ah ee dukumiintiyada muhiimka ah. Heerka Goobta Amaanka ah ayaa oo adeegsadaa xaqiijinta in ANR ay buuxinayso heerka ugu hooseeya ee ku dhaqanka oo waafaqsan Tusmada EPA LEP[18] iyo Tusmada Waaxda Cadaallada (DOJ) ee LEP.[19]

### 2.B. Helitanaka Isgaarsiinta Dadka uu Difaacaayo Sharciga Ameerikaanka Naafada ah iyo Sharciga Baxnaaninta

ANR ayaa xaqiijin doonta jawaabta wakhtigeeda baxda ee wax ku oolka ah oo la siinaayodadka u baahan helitaanka luuqadda iyo isgaarsiinta, xogta, iyo adeegyada kale ee la xiriira. ANR ayaa siin doonta adeegyada helitaanka luuqada iyo isgaarsiinta dadka adeegsada qaababka kala duwan ee isgaarsiinta ee gaarka u ah awoodooda iyo qaababka isgaarsiinta si bilaash ah iyo wakhtiga ku haboon, taasoo waafaqsan sharciga gobalka iyo federaalka iyo tilmaanta. ANR ayaa adeegsan doonta qandaraasleyaasha adeegyada Luuqada ee Gobalka Vermont si ay u bixiyaan adeegyada luuqada.[20] ANR ayaa qaadi doonta talaabooyinka ku haboon si loo xaqiijiyo helitaanka luuqada iyo isgaarsiinta lagu bixiyo ayadoo la adeegsanaayo bixiyaasha adeegga luuqada (tusaale, turjumaan), iyo in ay hayso diiwaannada shaqooyinkeeda. ANR ayaa sidoo kale xaqiijin doonta adeegsiga xarumaha kulannada dadwaynaha loo adeegsado ay yihiin uwo ay geli karaan dadka naafada ah.

## **Talaabada #3:** Tababarka Shaqaalaha iyo Kaalmo Qaateyaasha ANR

ANR ayaa siin doonta tababarka qasabka ah shaqaalaha iyo qaateyaasha kaalmada ANR kuwwaasoo qayb ka ah la xiriirida bulshada iyo la shaqeynta ayna u badan tahay inay u adeeggaan dadka u baahan adeegyada Helitaanka Luuqada ama dadka adeegsada qaababka kala duwan ee isgaarsiinta. Ujeedada tababarkaan waa in la xaqiijiyo in shaqaalaha iyo qaateyaasha kale ee ANR ay yaqaanaan masuuliyada shaqaalaha ANR si ay u baxshaan adeegyada helitaanka luuqada iyo isgaarsiinta, sida loo adeegsado khayraadka gobalka, iyo sida loo ilaaliyo kartida dhaqanka iyo muhiimadiisa marka ay la hadlayaan dadwaynaha, iyo mawduucyo kale oo la xiriira. ANR ayaa sidoo kale tababari doonta qaateyaasha hoose ee deeqda waxayna samayn dontaa tababar marka ay jiraan isbadello muuqda oo lagu sameeyo Qorshahaan, kuwaasoo qayb ka ah tababarka shaqaalaha cuub, iyo ugu yaraan afartii sanaba mar.

---

[18] Tusmada EPA LEP, *supra* note 9.

[19] Xeerarka Goobta Amaanka ah ee Tusmada DOJ LEP, 67 Fed. Reg. 41455, 41464 (Juun 18, 2002). Waxaa lagasoo xigtay: https://www.govinfo.gov/content/pkg/FR-2002-06-18/pdf/02-15207.pdf.

[20] Qandaraayada Hadda ee Gobalka oo Dhan, https://bgs.vermont.gov/purchasing-contracting/contract-info/current#Translation%20Services.

## **Talaabada #4:** Bixinta Ogeysiiska Dadwaynaha ee Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta

ANR ayaa bixin doonta ogeysiiska iyo xogta ku saabsan adeegyada Helitaanka Luuqada iyo isgaarsiinta ee la heli karo si loo xaqiijiyo in dadka u baahan adeegyada Helitaanka Luuqada iyo kuwa qaba baahiyaha isgaarsiinta ay helaan isgaarsiin wax ku ool ah, fursad loo siman yahay, iyo helitaanka macnaha leh ee barnaamijyada, hawlaha, iyo adeegyada ANR. ANR ayaa soo gelin doonta LAP iyo Habraaca webseedkeeda oo ku diyaarin doonta Qorshaha luuqaddo aan ahayn Ingiriis. GoogleTranslate (oo wata dignin) ayaa marhoreba si diyaaran loogu heli karaa ogeysiisyada oonlanka ah ee ku jira webseedyada ANR ayadoo lagu turjumaayo luuqado aan ahayn Ingiriis.

## **Talaabada #5:** La socoshada, Qiimeynta, iyo Wax ka badelka Qorshaha Helitaanka Luuqada

ANR ayaa si goos-goos ah ula socon doonta, u qiimeyn doonta, waxna uga badeli donta LAP, xeerarka, iyo Habraaca. ANR ayaa hayn doonta diiwaannada adeegsiga adeegyada Helitaanka Luuqada iyo isgaarsiinta iyo cabashooyin kata, fal celin, ama talooyinka la xiriira adeegyada la baxshay, xog uruurin ku samayn doonta shaqaalaha si ay wax uga waydiiso inta jeer ee ay adeegsadaan adeegyada helitaanka luuqada iyo isgaarsiinta marka ay shaqada ku jiraan; kormeerka iyo qiimeynta xiriirada wakaalladu la samayso dadka u baahan adeegyada Helitaanka Luuqada iyo dadka adeegsada qaababka kaladuwan ee isgaarsiinta; iyo casriyaynta xogta dadka ee bulshada iyo baahiyaha. ANR ayaa wax ka badeli doonta LAp si goos-goos ah iyo ugu yaraan afartii sanaba mar.

## E. Ku dhaqanka

ANR ayaa siin doonta shaqaalaha iyo qaateyaasha hoose falcelin goos-goos ah si loo xaqiijiyo in shaqaalaha iyo qaateyaasha hoose ay helaan xogta iyo khayraadka ay u baahan yihiin si ay u dhaqan gashaan uguna dhaqmaan LAP. ANR ayaa siin doonta shaqaalaha iyo qaateyaasha hoose fursado ay fikir ku bixinayaa si loo aqoonsado qaybaha ku jira Qorshaha, jadwallada, iyo agabka tababarka ee u baahan sharaxaad dheeri ah ama in wax laga badelo. ANR ayaa ka caawin doonta shaqaalaha iyo deeq qaateyaasha hoose ku dhaqanka shuruudaha iyo xeerarka LAP iyo Habraaca. Ku fashilmida ku dhaqanka si daacad ah shuruudaha iyo xeerarka Qorshahaan ayaa keeni karta cawaaqib dhanka anshaxa ah.

ANR ayaa adeegsanaysa *Habraaca Xuquuqda Madaniga ah iyo Cabashada Takoor* la'aanta si ay u bixiso xalka degdeg ah ee cdaalada ah ee cabashooyinka la xiriira fal jebinaaya LAP ama sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka.[21]

[21] *ANR, Habraaca Xuquuqda Madaniga ah iyo Cabashada Takoor La'aanta*, https://anr.vermont.gov/sites/anr/files/2021.12.08%20Final%20Title%206%20Grievance%20Procedure.pdf.

## Lifaaqa A: Erayada Lasoo Gaabshay

ACS: American Community Survey (of the U.S. Census) (Xog aruurinta Bulshada Mareykanka (Laanta Tirakoobka ee Mareykanka))

ADA: The Americans with Disabilities Act (Sharciga Ameerikaanka Naafada ah)

ANR: Vermont Agency of Natural Resources (Wakaallada Khayraadka dabiiciga ah ee Vermont)

CFR: Code of Federal Regulations (Xeerka Qawaaniinta Federaalka)

Census: United States Census Bureau (Laanta Tirakoobka Mareykanka)

DEC: Department of Environmental Conservation (Vermont); part of ANR (Waaxda Ilaalinta Bii'ada ee (Vermont); Qaybta ANR)

DOI: United States Department of Interior (Waaxda Arimaha Gudaha ee Mareykanka)

DOJ: United States Department of Justice (Waaxda Caddaaladda Mareykanka)

EPA: United States Environmental Protection Agency (Wakaaladda Ilaalinta Deegaanka ee Maraykanka)

FPR: Department of Forests, Parks, and Recreation Department (Vermont); part of ANR (Waaxda Kaymaha, Beeraha Raaxada, iyo Nasiibada (Vermont); qaybta ANR)

FWD: Department of Fish and Wildlife (Vermont); part of ANR (Waaxda Kaluunka iyo Duurjoogta (Vermont); qayta ANR)

LAP: Language Access Plan (Qorshaha Helitaanka Luuqada)

LEP: Limited English Proficiency (Aqoonta Ingiriisiga oo Kooban)

USDA: United States Department of Agriculture (Waaxda Beeraha Mareykanka)

## Lifaaqa B: Tixraacyada

- Garyaqaanka Guud ayaa haya Heshiiska is-Agaradka ah ee Dhammaan Wakaallada Federaalka ee quseeya Dedaalka Wax laga Badelya ee Dawlada Federaalka ah ee Waajibaadka Helitaanka luuqada oo ku jira Amarka Fulinta ee lambarkiisu yahay 13166 (Febraayo 17, 2011), https://www.lep.gov/sites/lep/files/resources/AG_021711_EO_13166_Memo_to_Agencies_with_Supplement.pdf.

- Sharciga Xuquuqda Madaniga ah 1964 (Title VI). 42 U.S.C. §2000d et seq., https://www.justice.gov/crt/fcs/TitleVI-Overview.

- Adeegga Cilmi Baarista Koongareeska, Xuquuqda Madaniga ah ee Dugsiga: *Kor U qaadista Wakaalada ee Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah 1964*, R45665, Abriil 4, 2019, https://fas.org/sgp/crs/misc/R45665.pdf.

- EPA, Tusmada Doorka Bulshada ee *Title VI ee Qaateyaasha Kaalmada ee EPA ee bixinaaya Barnaamijyada Ku Haboon Bii'ada*, 2006 (Tusmada Deeq Qaataha), https://www.govinfo.gov/content/pkg/FR-2006-03-21/pdf/06-2691.pdf.

- Tusmada EPA LEP, 2004, https://www.govinfo.gov/content/pkg/FR-2004-06-25/pdf/04-14464.pdf.

  EPA, Caawinta Dadka Aqoontooda Ingiriisigu Kooban tahay, https://www.epa.gov/ogc/assisting-people-limited-english-proficiency.

- EPA, LEP Amarka la Cusbooneysiiyay ee 1000.32, Ku dhaqanka Amarka Fulinta ee 13166: Kor u qaadisa Helitaanka Adeegyada ee Shaqsiyaadka Aqoontooda Ingiriisigu Kooban tahay 23, 2017), https://www.epa.gov/ogc/epa-order-100032-compliance-executive-order-13166.

- Amarka Fulinta 13166, Kor u Qaadista Helitaanka Adeegyada ee Shaqsiyaadka Aqoontooda Ingiriisigu Kooban tahay, 65 Fed. Reg. 50,123 (Agoosto 16, 2000), https://www.justice.gov/crt/federal-coordination-and-compliance-section-180.

- DOJ, *Fulinta Title VI ee Sharciga XUquuqda Madaniga ah 1964-Takoorka Wadanka ay Kasoo jeedaan ee ka dhanka ah Shaqsiyaadaka Aqoontooda Ingiriisigu Kooban tahay*, 65 Fed. Reg. 50123 (Agoosto 16, 2000), https://www.govinfo.gov/content/pkg/FR-2000-08-16/pdf/00-20867.pdf.

- DOJ, Tusmada LEP, 67 Fed. Reg. 41455 (Juun 18, 2002), https://www.govinfo.gov/content/pkg/FR-2002-06-18/pdf/02-15207.pdf.

- DOJ, Qiimeynta iyo Qorsheynta Helitaanka Luuqada ee Barnaamijyada Federaalku Maamulo iyo kuwa federaalku kaalmeeyo (Maajo 2011), https://www.lep.gov/sites/lep/files/resources/2011_Language_Access_Assessment_and_Planning_Tool.pdf.
- DOJ, Su'aalaha Ugu Badan ee Helitaanka Luuqada, Kaalmada Farsamada iyo Tusmada Barnaamijyada uu Maamulo Federaalku uuna Maalgasho Federaalku (Agoosto 2011), https://www.lep.gov/sites/lep/files/resources/081511_Language_Access_CAQ_TA_Guidance.pdf.
- DOJ, Aqoonta Kooban ee Ingiriisiga, https://www.lep.gov/.
- DOJ, Shuruudaha *ADA: Isgaarsiinta Wax ku oolka ah*, https://www.ada.gov/effective-comm.htm
- DOJ, Wax ka badelka *ADA: Muhiimad wayn u leh Dawladaha Gobalka iyo Dawlada Hoose*, https://www.ada.gov/regs2010/titleII_2010/title_ii_primer.html.
- Digital.Gov, *Xog ku saabsan Farsamooyinka Ugu Wanaagsan ee Maareeyaasha Xogta Webseedka*, https://digital.gov/2012/10/01/automated-translation-good-solution-or-not/
- Xog aruurinta Bulshada Mareykanka ee Laanta Tirakoobka ee Maraykanka, https://www.census.gov/programs-surveys/acs/about.html. https://www.lep.gov/maps/lma2015/Final_508/.
- Laanta Tirakoobka ee Maraykanka, Xog uruurinta Bulshada Mareykanka, Xogta Qyaasaadka 2020 ACS ee 5-ta sano, Liiska S1601, Dadka 5 sano jir iyo ka wayn, https://data.census.gov/cedsci/table?g=0400000US50&tid=ACSST5Y2020.S1601.
- Laanta Tirakoobka ee Maraykanka, Kaadhka Aqoonsiga Luuqada ee “I Speak”. https://www.lep.gov/sites/lep/files/resources/ISpeakCards2004.pdf.
- Waaxda Naafooyinka ee Vermont, Waayeelka iyo Nolosha Madaxa Banaan, Tignooloojiyadaha Maqalka, https://dail.vermont.gov/sites/dail/files/documents/HearingTerminology.pdf.

## Lifaaqa C: Aasaaska Sharciga

A. Qaateyaasha Deeqaha Fedeaalku waa inay ku dhaqmaan Sharciga Xuquuqda Madaniga ah iyo Helitaanka adeegyada

Sida ku cad sharciga Federaalka, qaateyaasha kaalmada dhaqaalaha ee Federaalka, ayna ku jirto ANR, ayaa laga doonayaa inay ku dhaqmaan shuruudaha xuquuqaha madaniga ah iyo helitaanka adeegyada ee federaalka. ANR ayaa lacagaha federaalka ka hesha EPA, Waaxda Arimaha Gudaha (DOI), Wakaallada Maamulka Xaalada degdega ah ee Federaalka (FEMA), iyo Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA).

Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah 1964 (Title VI) iyo xeerarkeeda dhaqan gelinta ayaa mamnuucaaya takoorka ku saleysan isirka, midabka, ama wadanka qofku ka soo jeedo kana dhaca barnaamijyada ama shaqooyinka helaya caawimaada maal gelinta federaalka.[22] Xeerarka dhaqan gelinta ee EPA iyo maxkamadaha ayaa turjumay mamnuucida ku cad Title VI ee takoorka ku saleysan wadanka qofka inay ku jirto takoorka ku saleysan aqoonta kooban ee Ingiriisiga.[23]

Xeerarka dhaqan gelinta Title Vi ee EPA ayaa ku qeexaaya deeqa qaate inuu yahay, "gobal kasta ama degmo kasta oo hoos tagta, qayb kasta oo gobal kamid ah ama waaxihiisa, wakaalad kasta oo dawladeed ama gaar loo leeyahay xarunta, ururka, ama wakaalad kale, ama qof kasta oo lacagaha federaalka Dhaqaalaha kaalmada si toos ah loo siiyo ama loosoo mariyo deeq qaate kale, uuna ku jiro qof kasta oo booskiisa dhaxlay, wakiil, ama qof uu ku wareejiyay qaatuhu, laakiin uusan ku jirin dheefsadaha ugu danbeeya ee kaalmada."[24]

Kaalmada Federaalka waxaa ku jira, laakiin kuma koobna, deeqaha iyo daymanka lacagaha federaalka; deeqaha ama sadaqooyinka hantida federaalka, heshiis kasta, qorshe kasta, ama qandaraas kale oo mid kamid ah ujeedooyinkiisu yahay bixinta kaalmada.[25] Sharciga federaalka ayaa shegaaya in Title VI uu daboolaayo barnaamijka ama shaqada guud ee qaateyaasha, xataa haddii keliya hal qayb oo kamid ah ururka deeq qatuhu uu helo kaalmada Dhaqaalaha ee Federaalka.

B. Shuruudaha iyo Tusmada Kor U qaadista Helitaanka Dadka U Baahan Adeegyada Helitaanka Luuqada

---

[22] 42 U.S.C. § 2000d et seq. Laga Soo xigtay: https://www.govinfo.gov/content/pkg/USCODE-2008-title42/html/USCODE-2008-title42-chap21-subchapV.htm; 40 CFR §7: https://www.epa.gov/sites/production/files/2013-09/documents/40p0007.pdf

[23] Maxkamada Sare ee Maraykanka ayaa u aqoonsan in takoorka ka dhanka ah shaqsiyaadka aqoonta Ingiriisigoodu kooban tahay ay tahay nooc kamid ah takoorka ku saleysan wadanka qofka, ayna jebinayso xeerka Title VI sidaas awgeedna la mamnuucaayo. *Lau v. Nichols*, 414 U.S. 563 (1974).

[24] 40 C.F.R. § 7.25.

[25] DOJ, Su'aalaha Guud ee Helitaanka Luuqada, Caawimaada Farsamada, iyo Tusmada Barnaamijyada uu Federaalku Sameeyo iyo Kuwa uu Federaalku Caawiyo, Waaxda Iskudubaridka iyo Ku dhaqanka ee Federaalka, Waaxda Xuquuqda Madaniga ah, Agoosto 2011, p. 2. Waxaa lagasoo xigtay: https://www.lep.gov/sites/lep/files/resources/081511_Language_Access_CAQ_TA_Guidance.pdf.

Madaxwayne Clinton ayaa saxiixay amarka Fulinta ee Federaalka 13166 (EO 13166) bishii Agoosto 11, 2000, *kaasoo ciwaankiisu ahaa Kor U qaadista Helitaanka Adeegyada ee Shaqsiyaadka Aqoontooda Ingiriisigu Kooban tahay*, si loo xaqiijiyo in dawlada federaalka ah ay siiso barnaamijyada iyo adeegyada "haddii kale ay u qalmi lahaayeen shaqsiyaadka aan aqoonta fiican u lahayn luuqada Ingiriisiga." [26] EO 13166 ayaa ka doonaaya dhammaan wakaaladaha federaalka inay qiimeeyaan barnaamijyada iyo adeegyada ay bixiyaan ayna aqoonsadaan baahiyaha xubnaha bulshada ee aqoontooda Ingiiriisigu kooban tahay (dadka leh LEP) si ay uga qaybgalaan barnaamijyadaas iyo adeegyadaas. Amarka Fulinta ayaa ku amraaya wakaaladaas federaalkainay xaqiijiyaan in dadka qaata kaalmada federaalka ay siiyaan shaqsiyaadka helitaanka macnaha leh ee LEP ee barnaamijyada iyo adeegyada.

Waaxda Cadaalada ee Maraykanka (DOJ) ayaa masuul ka ah shaqada guud ee dawlada ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 iyo EO 13166.[27] DOJ ayaa soo saartay tusmada guud ee koobaad ee EO 13166 sanadkii 2000[28] iyo tusmadeeda hadda oo soo baxday Juun 18, 2002.[29] Tusmada ayaa loo sameeyay inay ka caawiso wakaaladaha federaalka ah iyo qaateyaasha deeqaha inay ku dhaqmaan xeerka iyo qawaaniinta sharciga ah si ay u siiyaan shaqsiyaadka LEP helitaanka macnaha leh ee barnaamijyada, adeegyada, iyo shaqooyinka wakaallada federaalka.

Tusmada DOJ ayaa ku qeexaysa shaqsiyaadka leh LEP inay yihiin, "Shaqsiyaadka aan Ingiriisiga ugu hadlin sida luuqadooda hooto ayna kooban tahay awoodooda akhriska, qoraalka, ku hadalka iiyo fahanka Ingiriiska ayaa noqon kara kuwo aan aqoon badan u lahayn Ingiriisiga, ama 'LEP," waxay xaq u leeyihiin caawimaada luuqada ee la xiriirta adeeg, gunno, ama hawl gaar ah."[30] Tusmada DOJ ayaa ku qeexaysa baaritaanka Afarta Qaybood ee qaateyaasha deeqdu adeegsanayaa "bar biloowga" si loo baxsho helitaanka macnaha leh ee barnaamijyada la siinaayo dadka leh LEP:

1) Tirada ama cadadka shaqsiyaadka leh LEP ee kamid ah kooxda luuqada u qalma in loo adeego ama ay u badan tahay inay la kulmaan barnaamika ama deeq qaataha kamid abulshada u qalanta adeegga.
2) Heerka dadka leh LEP ee kooxaha luuqad gaar ah ay kula xiriiri karaan barnaamijka ayagoo codsanaaya kaalmo.
3) Nooca iyo muhiimada barnaamijka, shaqada, xogta, ama adeegga ee uu barnamaijku bixiyay ay u leeyihiin nolosha; iyo
4) Khayraadka uu heli karo deeq qaataha iyo qarashaadka adeegga.

EPA ayaa shaacisay tusmo bishii Juun 25, 2004 oo ciwaankiisu yahay, *Tusmada ku sucoto Qaateyaasha Kaalmada Dhaqaalaha ee Wakaalada Difaac Bii'ada ee qusaysay Mamnuucida Takoorka Ku saleysan Wadanka Qofka ee ku qoran Title VI taasoo*

---

[26] EO 13166, *supra* note 8.

[27] Ka eeg webseedka DOJ si aad uga taageerto wakaaladaha federaalka iyo qaateyaasha deeqda bixinta helitaanka macnaha leh ee shaqsiyaadka leh LEP: https://www.lep.gov/.

[28] EO 13166, *supra* note 8 at 50123.

[29] Tusmada DOJ LEP, *supra* note 13.

[30] *Id*., p.3 41459.

*Saamaynaysay Dadka Aqoontooda Ingiriiska ay Kooban tahay* (Tusmada EPA LEP). [31] Tusmada EPA LEP ayaa ka kooban baaritaanka Afarta Qaybood ee DOJ waxayna bixinaysaa naqshada shaqada ee qaateyaashu u adeegsanayaa dadka leh LEP si ay qaab macno leh ugu helaan barnaamijyada, adeegyada iyo shaqooyinka. EPA ayaa sidoo kale shaacisay Febraayo 10, 2017 amarka cusub ee EPA 1000.32 oo ciwaankiisu yahay, *Ku Dhaqanka Amarka Fulinta ee 13166: Kor u qaadisa Helitaanka Adeegyada ee Shaqsiyaadka Aqoontooda Ingiriisigu Kooban tahay* (Amarka EPA).[32] Amarka EPA ayaa dejinaaya filashooyinka, shuruudaha, iyo tusmada dheeriga ah si loo xaqiijiyo ku dhaqanka EO 13166.[33] Wakaalladaha kale ee federaalka ayaa sidoo kale bixiya tusmooyin ku aadan deeq qaateyaashooda caawimaada federaalka, ayna ku jiraan wakaalladaha gobalka, taasoo waafaqsan tusmada DOJ.[34] Si aad u hesho tilmaan iyo xog kale oo ku aadan shuruudaha shaqsiyaadka qaba LEP, booqo webseedka Aqoonta Ingiriisiga ee Kooban ee dawlada federaalka ah: https://www.lep.gov/.

### C. Shuruudaha iyo Tusmada Isgaarsiinta Wax ku Oolka ah

Qaybta 504 ee Sharciga Baxnaaninta ("Qaybta 504") ayaa amraaya in "[n]o ee qofka haddii kale u qalmi lahaa ee qaba naafada. . . laga reebo, ayadoo keliya lagu saleynaayo naafadiisa, ka qaybgalka, loo aqoonsado dheefaha, ama loo gaysto takoor la xiriira barnaamij ama shaqo qaata kaalmada dhaqaalaha ee Federaalka."[35] Sharciga Ameerikaanka Naafada ah (ADA) ayaa balaarshay waajibaadka guud ee Qaybta 504 si looga hortago takoor ku saleysan naafada dhammaan wakaallada dadwaynaha ayadoo aan loo eegayn kaalmada Dhaqaalaha ee Federaalka.[36]

Title II ee sharciga ADA ayaa qabanaaya dhammaan dawladaha Gobalka iyo kuwa hoose iyo dhammaan waaxaha, wakaallada, degmooyinka ujeedooyinka gaarka ah, iyo qaybaha kale ee dawlada Gobalka ama deegaanka ("haayadaha dawlada"). Wuxuu qabanayaa dhammaan barnaamijyada, adeegyada, iyo shaqooyinka wakaaladaha dawlada. Wakaallada Title II ee heshiiska kula gala wakaalladaha kale bixinta adeegyada dadwaynaha ayaa sidoo kale masuuliyad ka saaran tahay xaqiijinta in qandaraasleyaashoodu aysan takoorin dadka naafada ah.

Tusmada DOJ ayaa sheegaysa in wakaalaha daboolaayo ay qasab tahay inay bixiyaan "kaalmooyinka iyo adeegyada" marka loo baahdo si ay qaab hufan ula hadlaan "dadka qaba naafada aragga, maqalka, ama hadalka," kuwaasoo loogu yeero LAP maadaama

---

[31] Tusmada EPA LEP, *supra* note 9.

[32] Amarka EPA ee lambarkiisu yahay 1000.32, "Ku dhaqanka Amarka Fulinta 13166: *Kor u qaadisa Helitaanka Adeegyada ee Shaqsiyaadka Aqoontooda Ingiriisigu Kooban tahay*." Waxaa lagasoo xigtay: https://www.epa.gov/sites/production/files/2017-03/documents/epa_order_1000.32_compliance_with_executive_order_13166_02.10.2017.pdf.

[33] *Id.*

[34] Tusmada DOJ LEP, *supra* note 13. Waxaa laga soo xigtay https://www.lep.gov/title-vi-guidance-for-recipients.

[35] Pub. L. No. 93-112, 97 Stat. 394 (Sibteembar 26, 1973), 29 U.S.C. § 701 et seq.

[36] 29 U.S.C. § 794.

ay yihiin dadka adeegsada qaababka kaladuwan ee isgaarsiinta.[37] Go'aaminta noocyada kaalmada ama adeegyada loo baahan yahay si loola hadlo dadka qaab waxtar leh ayaa lagu saleeyaa nooca, mudada, balaarka, iyo nuxurka isgaarsiinta iyo sidoo kale qaababka caadiga ah ee isgaarsiinta qofka. Si aad u hesho tilmaan iyo xog kale oo ku aadan shuruudaha dadka qaba baahiyaha isgaarsiinta, booqo webseedka Sharciga Ameerikaanka Naafada ah ee dawlada federaalka ah https://ada.gov/.

[37] DOJ, Shuruudaha *ADA: Isgaarsiinta Wax ku oolka ah*, https://www.ada.gov/effective-comm.htm; DOJ, Wax ka badelka *ADA: Muhiimad wayn u leh Dawladaha Gobalka iyo Dawlada Hoose*, https://www.ada.gov/regs2010/titleII_2010/title_ii_primer.html.